

Gurayare Dameerkaygow!



Saciid Maxamed Cali “Xarawo”

Tixdan

Dameerku inkasta oo uu ka mid yahay gaadiidka iyo gammaanka Soomaalidu ku manaafacaadsato, haddana, maansooyin u dhigma faa`iidadaa lagama curin.

Tixdan “Gurayare Dameerkaygow”, ee uu tiriyay abwaan Saciid Maxamed “Xarawo”, wuxuu tilmaamayaa, kuna ammaanayaa, waxtarka dameerku leeyahay iyo dheefta lagu qabo. Tixdan kama muuqato buunbuunin iyo faan dheeraad ah, abwaanku wuxuu ku kaaftoomay inuu dameerka ku ammaano dheeftiisa iyo waxa uu yahay keliya.

Waxa uu ku ammaanay inuu yahay gaadiid ‘baladi’ ah oo aan dibadda laga soo dhoofin, kuna shaqaynin shidaal dibadda laga keeno, ee uu quuto cawska dalka ka baxa. Waxa uu sheegay in dameerku qabto hawlo kala duwan, sida inuu yahay gaadiid la fuulo, la rarto, biyo lagu dhaamiyo. Waa gaadiid la adeegsado isagoo sidiisa ‘cadaysimo’ u ah ama lagu xiriiriyo karreeto (gaari-dameer) iwm.

Abwaanku wuxuu dameerkiisa ku ammaanay in uu carruurta la koriyo, oo uu yahay isha dhaqaalaha reerka. Sidaas darteedna, uu ugu abaalgudayo ammaan faafta oo diiwaanka gasha.

Saciid Xarawo waxa uu heestan kaga qaybgalay tartan suugaaneed ay qabatay Idaacadda BBC sannadkii 1990, waxayna gashay kaalinteeda.

1. Gurayare dameerkaygow
2. Gaadiidkii dhaqankaygow
3. Geyi kale kamaad iman
4. Gacal ila shaqeeyoo
5. Ii gargaara baad tahay,
6. Misna guuto aan dhalay
7. Gurmalkoodii baad tahaye!!

Heey jac ... jac Jac!!!

8. Gurayare dameerkaygow
9. Marka aan gadhkaaga iyo
10. Gawsaha bir kuu sudho oo
11. Xakamaha ku giijiyoo
12. Gaadhi kugu xidhiidhiyo
13. Guudkaagu waa dahabe!!

Heey jac ... jac Jac!!!

14. Gurayare dameerkaygow
15. Geenyo faras ka roonoow
16. Markaad waajib gudataa baa
17. intii calafku ii galo
18. Guulle loogu mahadiyaa!!

Heey jac ... jac Jac!!!

19. Gurayare dameerkaygow
20. Giddi maalin iyo leyleey
21. Alaabada intaad guri
22. marna biyaha guryaha geynee
23. Marna beer galley aad fali

Gurayare Dameerkaygow!

24. Shidaal kuuma an gadee
25. Gasiinkaagu waa cawsee!!

Heey jac ... jac Jac!!!

26. Gurayare dameerkaygow
27. Gaajada xanuunka leh
28. Gaashaanka caabbiyaa
29. Garbahaaga weeyoo
30. Waxaad gasho, waxaad guddo
31. Ammaan gaar ahaaneed baan
32. Diiwaanka kuu gelin
33. Adduunyada ha gaartee!

Heey jac ... jac Jac!!!

— O —

About this Journal

Somali Studies: A peer-reviewed academic journal for Somali studies is a broad scope multidisciplinary academic journal devoted to Somali studies; published annually by the Institute for Somali Studies in print and online forms. *Somali Studies* aims to promote a scholarly understanding of Somalia, the Horn of Africa and the Somali diaspora communities around the globe.

Somali Studies provides a forum for publication of academic articles in broad scope of areas and disciplines in Somali studies, particularly focused on the humanities and social science. *Somali Studies* appreciates papers exploring the historical background or navigating the contemporary issues; special consideration will be given to issues which are critical to the recovery and rebuilding of Somalia, a country emerging from a devastating civil war.

Institute for Somali Studies (ISOS) is a research centre within Mogadishu University. The institute is established in 2001 and aims at knowledge generation through research and analysis on Somalia, Horn of Africa, and the Somali communities in abroad. The institute conducts and coordinates researches, workshops, conferences, discussions and dialogues; and disseminates findings, reports, and analysis through publications and events.

Somali Studies is open access journal and all articles are freely available to read, print and download from the website of the institute.

Disclaimer: All views and opinions expressed in the article(s) published in *Somali Studies: A peer-reviewed academic journal for Somali studies* are the sole responsibility of author(s) of the article(s). It does not necessarily reflect those of the editors, the Journal, nor the Institute for Somali Studies.

Published by Institute for Somali Studies

Hodan District, Near Km4 Square

Website: www.isos.so - Email: isos@mu.edu.so

Tel/Fax: +252 1 858118

Mogadishu, Somalia

Copyright© 2018 by Institute for Somali Studies

All rights reserved